Sharciga degaanka ee reeraha isdalbanaya

FIIRA GAARA! Shuruucda saameysa mawaadiniinta wadamada Midowga Yurub/wadamada EES iyo ehelkooda iyo kuwa waddan Midowga Yurub ah ku leh sharciga degaanka ee joogtada waxaad ka heleysaa warqada qoraalka ee gooni ah.

Haddii aad dooneyso in ehel kuu dhow kugula noolaato Iswiidhen waa inaad heysataa sharci.

Waa kuwee sharciyadu?

Xaaska, dadka isla nool, kuwa wada nool ii diiwan gashan

Xaq baad u leedahay inaad sharci hesho haddii aad tahay xaas, heysato wada nooli diiwan gashan ama aad la nooleyd qof degan Iswiidhen. Dalabkaada waa la soo diidi karaase tusaale ahaan hadduu dalabku been ku saleysan yahay, xiriirka idinka dhaxeeya yahay mid been ah ama aadan ku tala jirina inaad wada noolaataan.

Qofka aad guursan doonto, la noolaan doonto ama aad diiwaan gashan doonto

Waad heli kartaa sharciga haddii aad ku tala jirto inaad guursato, diiwaan gashato ama dooneyso inaad wada noolaataan qof ku nool Iswiidhen. Dalabkaada waa la soo diidi karaase tusaale ahaan hadduu dalabku been ku saleysan yahay, xiriirka idinka dhaxeeya yahay mid been ah ama laguu arko in xiriirkiinu aanu dhab aheyn.

Caruur ka yar 18 sano

Haddii da'daadu ka yar tahay 18 sano waxaad xaq u leedahay inaad la noolaato waalidkaa balse waa mas'uulkaadu sameeyaa ogolaasho qoraal ah.

Ehelka da'diisu ka weyn tahay 18 sano

Mar dhif ayaa laguu ogaalan karaa sharciga haddii aad dalkaadi kula nooleyd ehelka hadda ku nool Iswiidhen. Qeybtan waxa soo galaya caruurta da'doodu ka weyn tahay 18 sano iyo waalidka qofka degan Iswiidhen. Haddii aad noocan tahay waa inaad sida ugu dhaqsaha badan leh u codsataa sharci laga bilaabo maalinta ehelkaada Iswiidhen ka helo sharciga joogtada. Waa inaad cadeyn kartaa inaad la nooleyd ehelkaada intuusan u soo wareegin Iswiidhen iyo inaad isku tiirsaneydeen mudadi aad ku nooleydeen dalkiina taasoo keeneysa inaadan kala noolaan karina. Isku tiirsanaan waxa loola jeedaa inaad dhaqaale ahaan, bulsho ahaan iyo dareen ahaan isku tiirsaneydeen adiga iyo qaraabadaada ku nool Iswiidhen.

Shuruuda masruufka

Qofka ku nool dalka Iswiidan oo aad damacsan tahay inaad la noolaato, waxaa dhici karto in lagu xujeeyo in uu ku qaabili karo. Qaabilaada waxaa loola jeeda in qofkaas u yahay qof dhaqaale ahaan isku filan, una haysto hoy aanan ciriiri ahayn oo labadiina idinku filan markii aad dalka Iswiidan u soo guurto.

Warbixin dheeraad ku saabsan dadyoowga shuruudahaan ay khuseeyaan waxaad ka akhrisan karta goobta Internetka ee *Migrationsverket*.

Xageen wax ka codsadaa?

Waxaad sharciga ka codsan kartaa safaaradda ama qunsuliyadda iswiidhishka ee dalkaada ama meesha aad ku nooshahay. Waa inaad adigu shaqsi ahaan sameysaa dalabka. Dalabka lama aqbalayo haddii aad sameyso marka aad booqashada ku joogtay Iswiidhen. Qaraabadaadu kaagama sameyn karaan dalabka Iswiidhen. Isla sharcigaa ayaa ku qabanaya haddii aad tahay xaas, la noole ama qof ay u diiwaan gashan tahay inaad la nooleyd. Adareeska

Migrationsverket

201 218 Faktablad om uppehållstillstånd – familjeanknytning. Översättning till somaliska.
Produktion: Informationsenheten i Norrköping. Webbplats: www.migrationsverket.se

safaaradaha iyo qunsulooyinka waxaad ka heleysaa shabakda internetka www.ud.se.

Aqoonsi noocee ah ayaan u baahanahay?
Waxaad isticmaali kartaa foomamka ”Dalabka UT, FP, RD och FF”, nr 114021.
Waa inaad wadataa:
– baasaboorkaada
– laba sawir oo nooca baasaboorka oo laga qaaday wajigaada aanan ka weyneyn lix bilood.

Haddii aad tahay xaaska/odayga ama qofku ay u diiwan gashaneyd inuu kula noolaa waa inaad wadataa cadeyn nikaax/guur oo cadeyneysa arintiina. Haddii aad leedahay caruur ka yar 18 sano waa inaad wadataa cadeyntooda dhalasho iyo ogolaasho qoraal ah ee qofka mas’uul kaala ahaa.
La soco safaaradda ama qunsuliyadda aad geyso dalabka iney kaa rabi karto dokumenti intaa dheer. Warbixin intaa dheer ka eeg shabakadda www.swedenabroad.se ama la xiriir safaaradda ama qunsuliyadda.

Waa imisa qarashka?
Dadka badankiisu waa iney qarash bixiyaan marka ugu horeysa ee ay wax dalbanayaan iyo marka ay sharci cusbooniisanayaan. Lacagtaa ma aha mid laguu soo celinayo haddii sharciga lagu siiyo ama laguu diidaba. Warbixinta qarashka waxaad ka heleysaa warqadda qaaska xaqiiqada iyo shabakada wasaaradda socdaalka.

Maxaa lagu sameynayaa codsigeyga?
Markaad codsi la tagto waxaa lagaaga yeerayaa safaaradda ama qunsuliyadda. Halkaas ayaa sida caadiga ah laguugula yeelanayaa wareysi shaqsiyadeed arintaadana waxa loo gudbinayaa wasaaradda socdaalka ee Iswiidhen. Waaxda socdaalku (imigrayshinka) waxaa ay warqad u dirayaan qofka ehelka ah ee ku sugan Iswiidhen. Warqadaas waxaa ku qoran cadayn ah in aan guddoonay codsigaagii. Waxaa kale oo warqadaas ku qoran faahfaahin ah in qofku uu foomka su´aalaha ah ee la buuxinayo kala soo baxayo shabakada internetka ee waaxda socdaaka (Imigarayshinka). Su’aalahan ayaa qofku qoraal ahaan uga soo jawaabayaa una dirayaa waaxda socdaalka. Mararka qaarkood haddii waaxda socdaalku u baahato wax dhameystir ah oo ku saabsan dacwada, waxay taleefoon kula xiriiraysaa ama waraysi afka ah ugu yeeraysaa qofka ehelka ah ee halkaan ku sugan.

Yaa gaaraya go’aanka?
Wasaaradda socdaalka ayaa go’aan ka gaareysa sharciga. Marka go’aanka la gaaro waxa loo dirayaa safaaradda ama qunsuliyadda dalka dalabaadku ka yimid. Sida caadiga ah jawaabta go´aanka sharciga waxaa loo dirayaa qofka ehelkaaga ah ee ku soo dalbaday, waase haddii aad wakiilasho u qortay. Laakiin haddii aadan wax wakiilasho ah u qorin, waxaa kula soo xiriiraya safaaradda ama qunsuliyadda. Ogolaanshaha waxaa laguugu dhufanayaa baasaboorkaada intaadan u soo dhoofin Iswiidhen. Uma soo dhoofi kartid Iswiidhen si aad jawaabta ugu sugto.

Mudo intee la eg ayey jawaabtu qaadaneysaa?
Warbixinta ku saabsan inta la sugayo jawaabta waxaad ka heleysaa shabakada wasaaradda socdaalka.

Baaritaanka DNA-ka
Wasaaradda socdaalka waxey kuu soo bandhigeysaa baaritaan DNA ee arimaha sharciga ee reerka ka maqan qof ku nool Iswiidhn marka baaritaanka kale ee ehelnimo ku filnaan waayo in wasaaraddu go’aan ku gaarto arintaada sharciga. Haddii wasaaradda socdaalku kuu soo bandhigto baaritaan DNA markaa wasaaradda ayaa bixineysa wixii qarash ah.

Mudo intee la eg ayuu shaqeynayaa ogolaashaha?
Haddii aad dalkaada kula nooleyd ugu yaraan mudo laba sano ah ninkaada/xaaskaada/qofka aad la nooleyd, qofka aad la nooleyd oo kuu diiwaan gashanaa sida caadiga waxa markaa wasaaradda socdaalku ku siineysaa ogolaasho sharci joogto ah. Haddii aadan ku wada nooleyna dalkaada waxa wasaaraddu sida caadiga ku siineysaa sharci laba sano ah, mararka qaar mudo ka yar, balse ugu yaraan hal sano. Markaa kadib waa inaad dalbataa cusboonisiin.
Haddii aad wada nooshihiin marka aad sharciga ku meel gaarka aad heysatay laba sano waxaad heleysaa sharicga joogtada ah.

Migrationsverket

Maxaa dhacaya haddii xiriirkiinu dhamaado?
Haddii xiriirkiinu dhamaado mudada aad heysato sharciga ku meel gaarka ah markaa sida caadiga ah laguuma kordhinayo sharciga. Wasaaradda socdaalka waxey kaala noqon karta sharciga marka xiriirkiinu dhamaado. Arin walba goonideeda ayaa loo eegayaa haddii ay jiraan arimo qaas ah oo keenaya inaan sharciga lagaala noqon.

Xageen ka dalban karaa sharci kordhinta?
Haddii aad dooneyso in sharcigaada ku meel gaarka ah laguu kordhiyo isticmaal foomka ”Codsiga UT, FP, RD iyo FF”, lambar 114021. Dalabka ka sameeyso mid ka mida waaxyada sharciyada wasaaradda socdaalka Iswiidhen. Uma baahnid sawir, wasaaradda socdaalka ayaa sawir kaa qaadeysa marka aad dalabka sameysaneyso. Si sax ah ugu buuxi dalabka dhamaan warbixinta. Haddii dalabkaadu dhameystiran yahay marka aad celineyso waxaad heleysaa jawaab deg deg ah.

Waa in dalabka aad ku soo lifaaqdaa:
– cadeyn shaqsi (personbevis) aad ka dalban karto xafiiska canshuuraadka telefoonka wargelinta 0771-56 75 67 ama shabakadda www.skatteverket.se
– koobi baasaboorkaada ah.

Racfaan qaadashada
Haddii wasaaradda socdaalku kuu diido sharciga waxaad racfaan ka qaadan kartaa go’aankaa mudo sadax todobaad dhexdood laga bilaabo maalinta aad hesho go’aanka. Racfaanka waa inaad u dirtaa wasaaradda socdaalka taasoo mar kale eegi doonta arintaada. Haddii wasaaraddu ku adkeysato go’aankeedi hore ee diidmada waxa dacwadaada racfaan loo gudbinayaa maxkamaddaha socdaalka mid ka mida ee ka tirsan maxkamaddaha gobolka Stockholm, Göteborg iyo Malmö. Maxkamadda racfaankaada qaadi doonta waxey ku xiran tahay waaxda soo diiday dalabkaada. Haddii qof ehel ee Iswiidhen ku nool aad u ogolaatay inuu ku metelo markaa qofkaa ayaa kuu qori kara dacwadda racfaanka kuuna dirayo.

Foomamka
Foomamka waxaad ka qaadan kartaa ama ka dalban kartaa Internet, www.migrationsverket.se. Foomamka waxaa kaloo laga heleyaa safaaradda iyo qunsuliyadaha iswiidhishka.

Warbixin intaa dheer
Warbixin intaa dheer la xiriir Migrationsverket, ama wac 0771-235 235. Waxaad kaloo xiriiri kartaa safaaraddaha ama qunsuliyadaha iswiidhishka.

Migrationsverket